**Xeerka L. 32 rep**

**Nidaamka Diiwaanada Garsoorka.**

**MAAMULKA WASAAYADDA SOOMAALIYA TALYAANIGA**

**XOGHYAHA GUUD**

Marku arkay xeerka 4 Nofembre 1951, lamba. 1301 ee ansixiyay iyo lagu fuliyay Heshiiiska Ilaalinta dhulka Soomaaliya;

Marku arkay Xeerka Nidaamka Garsoorka lagu meelmariyay Amarka ku taariikhaysan 2 Febberaayo 1956 lr.5;

Marku Garowsaday baahida loo qabo in la soo saaro xeer lagu socdosinayo Diiwaanka go’aanda garsoorka;

Marka uu dhagaysay Guddiga Maamulka;

Soo geedinta talada Agaasimaha Xeerarka AA.GG;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO**

**Qod. 1**

Waxaa la meelmariy xeer nidaamiye midaysan ee loo soo saaray Diiwaanka go’aanada garsoorka oo ka kooban 14 qod.

**Qod. 2**

Dekereetafdan waxay dhaqangalayasaa lixdan cisho gudahooda ee ku xigta maalinta lagu bahiyo Faafinta Rasnaiga

Mogadisho, 23 Maarso 1956.

Xoghayha Guud

**Franca**

Waxa lagu hubiyayiyo laga diiwaangeliya – Diw.lamba. 15 – bogga lamba. 42

Muqdisho, 23 Maarso 1956.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro.**

**NIDAAMKA DIIWAANADA GARSOORKA**

**Qod. 1**
**Diiwaanka Go’aanda Garsorka**

Diiwaanada g’aanada garsoorka waa Qayb ka tirsan Taliska Boliska Soomaaliyeed, waana mid keliya ee Dalka Ka jira, wuxuuna hoos yimaadaa awoodda iyo ilaalinta degdegga ee Dadweyne u Doodaha. Xaafiiskaas waxaa lagu keydiyaa waraaqaha iy qaraarada ku xusan qod. 2 iyo 3 oo ay ku dhawaqeen hay’adaha garsoorka soomaaliyeed, iyo sido kale qaraarada ay ku dhawaaqaan hay’adaha garsoor ee shisheeyaha oo aqoonsi ka haysta si xeerka waafaqsan.

**Qod. 2**
**Qaraarada Ciqaabta ee lagu Qorayo Diiwaanka**

Diiwaanka garsoorka waxaa lagu qoro iyo lagu ridayo:

a) xukunada ciqaabta ee dhaqabgalay iyo dekeretooyinka ciqaabta la fuliyay;
b) xukunada dambiyada laga siidaya inta dacwaddu socotay ama go'aan laga gaaray oo noqday kuawa aan laga noqon karin;
c) xukunada lagu bixinayo ama looga noqonayo dhaqancelinta;
d) qaraar kasta oo ku saabsan dabbaqidda, wax ka baddalka ama ka noqoshada ciqaab ama tallaabo nabadgalyo iyo mid waxtar xeer.

Laguma qorayo diiwaanka xukunada iyo dekereetooyinka ciqaabeed ee ku saabsan dambiyada fudud ee la oggolyahay maamul ahaan in lagu dhameeyo; xukunka siidaynta dambiga fudud xeerkuna ganaax keliya u jideeynayo; xukunka siidaynta oo ku saabasn in falku aanu jirin, eedaysanuhuna aanu gelin, ama falku aanu dambi ahayn, marka aan la dabbaqin tallaabo nabagalyo; xukunka siidaynta ee la xariira maqnaashaha codsiga been abuurka ama la cafiyay, marka laga reebo in horay loogu dhawaaqy xukunka ciqaabta ama siidaynta caddayn la'aan awgeed islafalka isaga.

**Qod. 3**
**Qaraarda Madaniga iyo kuwa Mamul ee lagu Qorayo Diiwaanka**

Diwaawanka go'anada garsoorka waxaa lagu soo minguurinayaa;

a) xukinnada madaniga ee dhaqangalay ee ku saabsan sharidda sharci ama awood la'ida iyo kuwa looga laabanayo; qaraarda Garsooraha madaniga uu ku amrayo in qof lagu hayo xarumaha dhimirka am ka noqoshada qaraarkaas isaga ah; xukunda musalifka, lagu ansixinayo heshiis, ka noqoshada musalinimada ama dhaqancelinta madaniga;
b) qaraarada maamul ee muwaadinimada lagu wynayo iyo cayrinta ajnabiga.

**Qod. 4**
**Samaynta Kaaraka**

Qaraarada lagu sheegay qodobka la soosheegay waxaa lagu samaynayaa kaaarar loogu talagalay oo uu diyriyo Kaaliyaha Garsoorha Maxkamadda ku dhawaaqay qaraarka aan ka niqoshada lahayn ama, ama haddi duris laga qaatay Kaaliyaha Maxkamadda darajadi ugu dambaysay ee ku dhawaaqday.

Qofkasta iyo qaraar kasta oo ay arrintu khusayso waxaa loo sameeynaya hal kaar.
Haddii ay jiraan dambiya badan ee qodfka lagu xakumay, karaka ayaa si gooniya lagu qorayaa dambi kasta, kolba sida qaraaradu ay ugu qoranyihiin.

Diyaarinta kaaka Kaaliyuhu wuxuu adeegsanayahau foom/qaab saxiixa suulka ee eedaysanaha, iyado Masuuliinta Boliiska ay markasta ay ku soo lifaaqayan ashtaka kasta ee laga keeno.

Kaarka waa in lagu qoraa muddo aan ka dambayn maalinta tobnaad ee taarkhda uu qaraarku noqday mid an la duri karin.

Marka la samaynayo kaarka waa in lagu sheegaa nuqulka asalka ee qaraarka karaka loola jeedo iyo diiwaanka guud ee arrimaha ciqaabta,

**Qod. 5**
**Gudbinta Kaarka**

Isla marka Kaaliyuhu uu sameeyo kaarka, wuxuu u dirayaa xaafiiska Diiwaanka go'aanada garsoorka isago warqad sii raacinaya kadibna loo soo celinaya hubaal celinteeda.

Haddii ay caddaato qofka laga hadlayaa in aanuu lahayn dambiyo hore, Kaaliyuhu wuxxu qorayaa oo ka diyaarinayaa nuqul labaad isla karaka.

Haddii qofku uu yahay muwaadin ajnabi ah, kaaliyaha wuxuu kalo qorayaa oo gudbinayaa nuqulka ee kaarka,kaaso loo dirayo Dawladda uu ajnabigu ka tirsanyahay, si heshiisyada caalamiga ay qaban ama nidaanka wax is-dhaafsiga

## Qod. 6
## Keydinta Kaarka

Kaarka isla marka uu soo gaaro Diwwanka go'amada garsoorka, waxa lagu qorayaa diiwaanka qoritanaka. Haddii qaararku uu ku saabasnayahay qof aan dambiyo hore lahayn, Qaybta Diiwagelinta waxay ku qoraysa nuqul ka mida kaaraka fayl lagu caddeynayo magaca buuxa ee qofka, qaabka farahiisa, lamarka taxana ee faylkaa iyo guud ahaan kaarka. Nuqulka kale ee kaarka waxaa lagu haynaya faylka faraha. Qaybta Diiwaagalinta waxay kaloo buuxinaysaa kaar-yare kale oo lagu qorayo magaca buuxa ee qofka, qaabka farahiisa iyo tirada faylasha ku jira. Kaar-yaraha waxaa lagu keydinayaa santuuq ku lambaraysan xarfaha alifleyda isku xiga. Haddii kaarku uu khuseeyo qof dambiyo hore lahaa, waxaa lagu xirayaa faylkii magaciisi hore ugu jiray, faylka dushiina loogu qorayo.

## Qod. 7
## Ka saaridda Qoraallada Diiwaanka

Qoraalka ku qoran Diiwaanka waxaa laga saaraayaa isla marka si rasmiya loo hubiyo dhimashada qofka ay khusaysay, ama marka ay ka soo wareegto 80 sano dhalashada qofkaas isaga. Waxaa kaloo laga saarayaa qoraalada ku saabsan:

1) xukunka siidaynta dambiga, marka ay ka soo wareegto tobon sano maalinta uu xukunkaaso noqdo mid aan laga noon Karin haddii dacwadda looga dhawaaqay, ama haddii la soo dhaafay muddadi dhaqn ka baxa haddii looga dhawaaqay doodda dacwadda dhexdeea;
2) xukunada iyo dekeretooyinka ciqaabta dacawdaha fudud ee ganaaxa lacagta, marka ay ka soo wareegto tobon sano maalinta la fuliyay ganaaxa ama qaab kale uu u baaba'ay;
3) xukunada siidaynta ku saabssan dambiyada fudud, marka ay ka soo wareegto saddex sano maalinta uu noqday mid aan laga noqon karin.

Waxaa kaloo laga saarayaa qoraallada ay muuqato in la badiyay (duplicate) ama si khalada dadkale loo siiyay sababa la xariira magacya beena ee eedaysanuhu sheegatay ama magac khaldamay in dacwaddu ay socotay, haddii xukunka qoraalka isaga ku saabsan lagu baabi'iyay xukun ku xigay.

## Qod. 8
## Caddaymaha ay Bixiyaan Msuuliinta Dawladda

Masuulinta Garsoorka waxay xaq u leeyihiin in ay helaan sababa caddaladda la xariira caddaynta qoraalldada idil qof gaara laga hayo. Xaqaasi mid la mida waxay u sugnaaday Maamulka dawladda marka caddaynta ciqaabta loo baahanyahay in lagu bixiyo hawlqabad qofka la xariira qofka caddayntu ay qusayso; laakin caddayntaas laguma sheegayo xukunka siidaynta dambiga qofka da'ayaraha ee aan la eedayn karin, iyo xukunka ciqaabta la xariira da'ayarata marka, iyadoo aan laga noqn in la caddeeyay dhaqancelinta.

**Qod. 9**
**Caddaymaha la Siiyo Dadka Gaarka**

Qofka ay ku qusayso qoraallda Diiwaanka go'aanka garsoorka wuxuu xaq u leeyahay in la siiyoo caddaynta iyada, iyado sababta uu codsanayo aan loo bahnayn.

**Qod. 10**
**Qoraalada aan lagu sheegayn Caddaymaha Ciqaabta ay Qeysdiistaan Dadka Gaarka**

Caddaymaha la bixiyo marka ay codsadaan dadka gaarka laguma sheegayo:

1) go'aanada siidaynta dambiga;
2) go'oaanada ciqaabta xaaaladaha soo socda:
   a) marka la amro in ciqaabta aan lagu seegin, bilshardi in waxtarka aan lagala noqon;
   b) marka ciqaabta xukunka ay ku xigtay siidaynta dambiga sababa la xariira xukun dib-u-eegis;
   c) marka uu yahay xukunkii ugu horreyay ee gaanax ama ciqaab xariga, oo keli ah ama midkale la socota oo aan ka badnayn lixbilood oo xabsi ah ama sanad xiritaan ah, oo lagu riday qofka marka uu dambiga galay aan gaarin da'ada siddeed iyo toban jirka, haddii aanau ka dib ku soo bixin xukun dambe ee uu xarig ku mutaysto;
   d) marka la caddeey in dambigii xukunka ciqaabta baabi'iyay, amase la caddeeyay dhaqancelinta iyadoo aan laga noqon;
3) qaraarada lagu sheegay qod. 3.

**Qod. 11**
**Codsiga iyo Bixinta Caddaymaha**

Codsiga caddaymaha waa in lagu soo hagaajiyaa Qaybta Diiwaanda go'aanada garsoorka. Codsiga waa in laguu muujiyaa magaca iyo naynaasta qofka loola jeedo, magaca aabaaha iyo hooyada, taariikhda iyo goobta dhalashada, iyo tilmaan kasta oo lagu aqoonsan karo qofka isaga iyo xitaa loo baahd farahiisa.

Caddaynta waxa bixinaya madaxa Xaafiiska Qaybta Diiwaanka go'aanada garsoorka. Haddii Diiwaanka aanay ku jirin wax qoraala, ama ay ku jiraan qoraallo marka la ego xeerka aan loo baahnayn in la diiwaangeliyto, Madaxa Qaybta wuxu ku qoraya cadaynta "Waxba"; haddii kale wuxuu ku minguurinayaa caddaynta go'aanada lagu qorayo sida ay taariikh ahaan isugu xigaan.

Marka caddaynta la qorayo ku saabsabsan xukunada ciqaabta, ka sakow in la sheegayo taariikhda iyo Hay'adda garsoor ee soo saartay go'aanka, waa in lagu sheegaa cinwanka dambiga, ciqaabta xarigga iyo ganaaxa lagu xakumay, ciqaabaha dheeraadka, tallaabada nabadgalyo iyo wixii waxtarro kale ee xeerku siiyay.

Madaxda Qaybta Diiwaanka caddaymaha ciqaabaha uu bixiyo wuxuu ku qoraya taariikhda iyo saxiixiisa wuxuna saarayaa shaabadda Qaybta isago gelinaya warqadda buug gaara.

Caddaymaha Diiwaanka waxaa lagu qorayaa warqad canshuuran (carta Bollata). Caddaymaha Diiwaanka go'aanada garsoorka waxaa saxiixaya Madaxa Qaybta Diiwaanka waxaana la suntaya Dadweyne u Doodaha.

**Qod. 11**
**Khilaafyada ku Saabsan Qoralada iyo Caddaymaha**

Marka uu khilaaf ka dhasho waxyaabaha ku saabsan arrimaha lagu soo sheegay qodobadii hore, ama la la waydiisto saxitaanka qoraarallada ama caddaymaha Diwaanka go'aanka garsoorka, qofka danta ka leh ayaa soo weydiisanaya Dadweyne u Doodaha. Qofka danlaha haddii uu doonayo in uu ka horyimaado habraaca, wuxuu iqtiyaar u leeyahay in uu soo gudbiyo shil fulin.

**Qod. 13**
**Xerarka kala Guurka**

Ilaalla ay ka dhammaanayso muddada Maamulka Wasaayadda Soomaaliya ee Talyaaniga, muwaadininta talyaaniga waxaa u jirayaa Xeerka Diiwaanka go'aanada garsoorka ee ku jira Xeerka Habka Ciqaabta iyo xeer nidaamiyaha fulinta.

**Qod. 14**
**Xeerka Fulinta**

Marka uu dhaqangalo nidamkaan, waxaa laga tirtiray Madaxa Qaybta Diiwaanka go'aamada garsoorka dhammaan wixii qoraallo ku jiray Diiwaanka iyo qaraarada la xariira, sida uu qabo qod. 2, aan la oggolayn qoritaanka.

Xoghayaha Guud

**Faranca**